Muxuu yahay Adeegga Dhallinyarada?

Buug Tilmaame ah oo loogu talogalay qoysaska doonaya inay wax ka ogaadaan adeegyada dhallinyarada ee Australia

Horudhac

Buug-yarahan waxaa loogu talogalay qoysaska u soo haajirey Australia isla markaasna jecel inay fahmaan kaalinta adeegyada dhallinyarada iyo sida ay ula shaqeeyaan dadka dhallinyarada ah.

Dadka qaarkiis waxaa laga yaabaa inaysan maqlin shaqaalaha dhallinyarada ah, kuwo kalena waxaa laga yaabaa inaysan aqoon waxay qabtaan, ama sida ay u caawin karaan carruurtooda iyo qoysaskooda. Macluumaadka ku jira bug-yarahan wuxuu qoysaska ka caawinayaa inay fahmaan muhiimadda dadka ka shaqeeya adeegyada dhallinyarada ee Australia.

Muxuu yahay macnaha erayga 'Dhallinyaro?

Dhaqan kastaa wuxuu leehay fikrado kala duwan oo ku saabsan waxa ay tahay macnaha in la noqdo dhallin-yaro, iyo noocyada kaalinta ay tahay in dadka dhallinyarada ah ku yeeshaan qoyska iyo bulshada inta ay korayaan.

Australia, dadka dhallinyarada ah oo da'doodu u dhaxeyso 12 ilaa 25 waxaa badanaa loogu yeeraa 'Dhallinyaro'. Mararka qaarkood, dadka dhallinyarada ah oo da'doodu u dhaxeyso 12 iyo 18 waxaa loogu yeeraa 'qaan-gaar', sidoo kale dadka dhallinyarada ah oo da'doodu u dhaxeyso 21 ilaa 25 sano waxaa loogu yeeraa 'waayeel dhallinyaro' ah. Erayadan waxaan u isticmaalnaa inay muujiyaan marxaladaha kala duwan oo u dhaxeeya ahaansha ilmo iyo ahaanshaha waayeel.

Adeegyada 'Dhallinyarada' barnaamijyada ama nashaadyada waxaa gaar ahaan loogu talogalay dadka dhallinyarada ah oo da'doodu u dhaxayso 12 ilaa 25 sano.

Maxay yihiin shaqaalaha dhallinyarada?

Australia, shaqaalaha dhallinyarada waa dad waayo-aragnimo leh oo u tababaran si ay u caawiyaan dadka dhallinyarada ah, ama siiyaan nashaadyo ammaan ah oo xiiso badan. Looguma talogalin oo keliya dadka dhallinyarada ah ama qoysaska ay hayso 'rabshad'.

Shaqaalaha dhallinyarada waxay leeyihiin kaalimo kala duwan oo ay ka mid tahay 'La-Taliye', Shaqaalaha caafimaadka dhallinyarada', shaqaalaha bulshada ama 'shaqaalaha horumarinta bulshada'.

Maxay yihiin barnaamijyada iyo adeegyada dhallinyarada?

Waxaa jira hay'ado badan kuwaas oo caawiya qoysaska iyo dadka dhallinyarada ah ee Australia. Hay'adahaas qaarkood waxay shaqaaleeyaan shaqaalaha dhallinyarada gaar ahaan inay caawiyaan dadka dhallinyarada ah.

Gaar ahaan, adeegyada iyo barnaamijyada dadka dhallinyarada ah waxaa laga heli karaa:

- Dugsiga ama TAFE-ka
- Dowladaha Hoose
- Kaniisadaha, masaajiddada ama soomacadaha
- Xaruumaha Macluumaadka siiya Soo-galootiga (tusaale Migrant Resource Centres)
- Xaruumaha caafimaadka bulshada
- Xaruumaha bulshada
- Xaruumaha sharciyeed ee bulshada
- Adeegyada guryaha dhallinyarada
- Adeegyada shaqo-siinta
- Adeegyada Iimaha

Maxaa looga baahan yahay adeegyada dhallinyarada?

Inta u dhaxaysa da'da 12 iyo 25 dadka dhallinyarada ah waxay maraan dhowr marxaladood oo koritaan oo ka bilaabata carruurnimada (childhood) ilaa noqoshada qof waayeel ah. Inta lagu jiro sanooyinkaas, baahiyaha iyo arrimaha dadka dhallinyarada ah sida badan la mid maahan kuwa ilmaha yar ama kuwa dadka waayeelka ah, waxaana laga yaabaa inay u baahdaan taageero dheeraad ah. Taas oo gaar ahaan khusaysa dadka dhallinyarada ah oo u soo haajirey Australia. Dad badan oo dhallinyaro ah ayey ku adag tahay inay u sameeyaan isku-miisaanaan u dhaxaysa waxyaalaha laga filayo guriga iyo waxyaalaha ay ka filayaan saaxiibadooda ama dugsiyadooda. Waxay badanaa dareemayaan kelinimo ayadoo aan cidina runtii ka warqabin waxay yihiin marxaladaha ay marayaan.

cmyi centre for multicultural youth issues

Maxay muhiim u yihiin adeegyada dhallinyarada iyo shaqaalaha dhallinyarada?

Adeegyada dhallinyarada iyo shaqaalaha dhallinyarada waa muhiim sababtoo ah waxay halkaas uga jiraan inay dadka dhallinyarada ah iyo qoysaska. Waxaa adag in lala qabsado nolosha Australia ka jirta iyo la socodka nidaamyada waxbarashada cusub, shaqo-helidda iyo caafimaadka, luqadda cusub iyo hababka nolosha oo kala duwan.

Waayo-aragnimooyinka caadiga ah qaarkood oo ay la kulmaan qoysaska ku cusub Australia waxaa ka mid ah:

- Carruurtaada oo doonaysa inay waqti badan la qaataan saaxiibadooda halkii ay guriga joogi lahaayeen;
- Adigoo leh fikrado ka duwan kuwa carruurtaada oo ku saabsan waxa laga filayo, tusaale ahaan xirriirada dadka iyo guurka;
- Idinka oo mar labaad isbaranaya ka dib muddo aad kala noolaydeen, amase sabab ah inuu jiro guur cusub ama isbaddallo kale oo ku dhacay qoyska;
- Inaad isku muranteen arrimo lacageed ama tegidda dugsiga ama helidda shaqada.

Shaqaalaha dhallinyarada waxay samayn karaan inay dadka dhallinyarada ah iyo qoysaska ka caawiyaan arrimahan qaarkood. Haddii aysan karina ayagu, waxay badanaa kuu heli karaan cid kale oo caawin karta.

Maxay yihiin noocyada kala duwan ee barnaamijyada iyo adeegyada dhallinyarada?

Waxaa jira noocyo kala duwan ee barnaamijyada iyo adeegyada dhallinyarada oo loogu talogalay dadka dhallinyarada ah. Barnaamijyada dhallinyarada waxaa badanaa ka mid ah dadka dhallinyarada ah oo si koox ah isugu yimaada nashaadyo.

Tusaaleyaalka qaarkood ee barnaamijyada ama nashaadyada waxaa ka mid ah:

- Kooxaha shaqada guriga ama naadiyada (tusaale, caawimaadda bare-guriga oo ka caawiya shaqada dugsiga)
- Barnaamijyada shaqo-helidda (tusaale, caawimaadda sida loo qoro Resume-ga ama C.V-ga, sida loo helo shaqo mushaari ah ama ku-qoridda meel shaqo)
- Nashaadyada dugsiga ka dib (tusaale, sida isboortiga ama samaynta xuliyadda)
- Barnaamijyada madadaalada (tusaale, qoob-ka-cayaarka qaraamiga ama casriga ah)
- Barnaamijyada isboortiga (tusaale, kubadda koleyga, kubadda cagta, dabaasha)
- Nashaadyada waqtiga fasax-weynaha dugsiga (tusaale, tegidda daawashada filimka, booqashada suuga ama kaambo fasax lagu qaato)
- Barnaamijyada hoggaaminta, la-socodka iyo tababarka kale (tusaale, barashada xirfadaha ka-hadlidda fagaaraha dadweynaha)
- Barnaamijyada kooxaha dhallinyarada (tusaale, xoojinta qabka, aqoonsiga iyo dhaqanka).

Suldaano

Shaqaalaha dhallinyarada oo dugsiga jooga waxaa la weydiistey inay caawiyaan ardayga (Suldaano) taas oo u soo haajirtey Australia. Ardaygan waxaa dhaafay casharro badan, barayaashuna waxay ka walaacsan yihiin xaaladdeeda.

Markii shaqaalaha dhallin-yaradu la kulmeen Suldaano, waxay ogaadeen in nolosha Australia ay ku adkaatay ayna caawimaad uga baahan tahay soo gadashada buuggagta dugsiga iyo shaqo-guriga oo dugsigu soo diro. Shaqaalaha dhallinyaradu waxay kula taliyeen inay tagto naadiga shaqo-guriga toddobaadkii kasta oo lagu qabto dugsiga waxay kaloo ka caawiyeen soo gadashada buuggagta dugsiga ay u baahan tahay.

Qoyska Suldaano maysan ogayn inay aragto shaqaalaha dhallinyarada iyo tegidda nashaadka lagu qabto dugsiga ka dib, sababtoo ah maysan ogayn cidda ay Suldaano u tagayso ee kooxda shaqo-guriga. Waxay awoodeen inay la kulmaan shaqaalaha dhallinyarada ayna kala hadlaan waxay tabanayeen. Isla markiiba waxay garteen waxa ay u qaban karaan shaqaalaha dhallinyaradu, waxayna soo arkeen kooxda shaqo-guriga si ay u arkaan waxa meeshaas ka socda, markaasna waxay u ogolaadeen in Suldaano ay ka qaybgasho.

Suldaano waxay si joogto ah uga qaybgashay kooxda shaqo-guriga, markaasna waxaa hagaagey shaqooyinkeedii dugsiga mar dambena kama maqnaan dugsiga.

© Centre for Multicultural Youth Issues 2006

Maxay yihiin barnaamijyada taageeridda dhallinyarada?

Barnaamijyada taageeridda dhallinyarada waxay badanaa bixiyaan taageero shakhsiyeed oo ku saabsan arrimo gaar ah. Barnaamijyadan waxay dadka dhallinyarada ah iyo qoysaska ku caawin karaan arrimo dhowr ah, oo ay ka mid yihiin:

- Caawimaad la taaban karo (tusaale, buuxinta foomamka, isku-qoridda daraasadda, tegidda ballamaha, ama helidda buuggagta dugsiga)
- Macluumaad ku saabsan waddooyinka furan iyo mawaadiicda khusaysa dadka dhallinyarada ah iyo qoysaskooda (tusaale, arrimaha dhaqanka)
- Caawimaadda xoojisa xirriirada qoyska, saaxiibada ama dugsiga (tusaale, hagaajinta wada-hadalka qoyska dhexdiisa)
- Macluumaadka ku saabsan adeegyada, barnaamijyada ama nashaadyada kale, iyo caawimaadda sidii loo heli lahaa (tusaale, caawimaadda macluumaadka sharciyeed, helidda dhakhtarka ama macluumaadka socdaalka)
- Cid kale oo lagala hadli karo sidii xal loogu heli lahaa dhibaatooyinkaas – mararka qaarkood tan waxaa loo yaqaan 'La-talin'

Barnaamijyada ama adeegyada dhallinyaradu ma heli karaan dadka dhallinyarada ah oo dhan?

Badiba barnaamijyada iyo adeegyada dhallinyarada waxaa la siiyaa kooxo gaar ah ee dadka dhallinyarada ah.

Tusaale, nashaadyada qaarkood waxay noqon karaan kuwo:

- gabdhaha ama wiilasha oo keliya (tusaale, dabaasha gabdhaha ama soccer-ka wiilasha)
- koox da' gaar ah (tusaale, 15 – 18 sano jiryaasha ama 18 – 21 sano jiryaasha)
- dadka dhallinyarada ah oo ku nool, ka shaqeeya ama wax ka barta xaafado ama goobo gaar ah,
- dadka dhallinyarada ah oo ka soojeeda asal dhaqaneed ama luqadeed oo gaar ah (tusaale, koox gabdho ah oo ku hadla-Soomaaliga, ama koox dhaqanno-badan)
- 'Free of Charge = Lacag La'aan' taas oo macnaheedu yahay inaadan wax lacag ah bixinayn, isla markii ay dadka kale bixinayaan lacag,
- Kuwo siiya taageero arrimo gaar ah oo keliya (tusaale, ka caawinta dhibaatooyinka dhaqaale),

Barnaamijyo badan oo loogu talogalay dadka dhallinyarada ah oo da'doodu ka yar tahay 18 sano waxay u baahan doonaan ogolaanshaha waalidiintooda ama weliyadooda ka hor intuusan qof dhallinyaro ah ka qaybgelin barnaamijka.

Maxay yihiin faa'idooyinka ka-qaybgelidda nashaadyada ama barnaamijyada dhallinyarada?

Faa'idooyinka qaarkood ee ka qaybgelidda barnaamijyada, nashaadyada ama adeegyada waxay yihiin:

- Helidda caawimaad gaar ah ee xagga waxbarashada, caafimaadka ama shaqo-helidda
- Barashada xirfado gaar ah (tusaale, luqadda Ingiriisiga, Isboortiga, ka-hadlidda fagaaraha dadweynaha)
- Samaysiga saaxiibada
- Helidda macluumaadka ku saabsan adeegyada kale (tusaale, waxbarashada, caafimaadka ama shaqo-helidda)
- Helidda taageero – tani waxay badanaa ka caawisaa dadka dhallinyarada ah inay isku kalsoonaadaan ayna la yeeshaan xirriiro xooggan qoyskooda, saaxiibadooda iyo bulshadooda.

Qof kastaa wuxuu leeyahay xaq inuu si buuxda uga qaybgalo bulshadiisa ama bulshadeeda uuna ku raaxaysto faa'idooyinka waxyaalaha la heli karo. Shaqaalaha iyo adeegyada dhallinyarada waxay dadka dhallinyarada ah iyo qoysaskooda ka caawin karaan siday sidaas u samayn lahaayeen.

Maxaan ka fili karaa markii ilmahaygu ka qaybgalo nashaad ama barnaamij dhallinyaro?

Waxaad fili kartaa in adeegyada, barnaamijyada ama nashaadyada dhallinyaradu siiyaan bey'ado ammaan iyo nabad ah dadka dhallinyarada ah ayadoon loo eegayn dhaqanka iyo asalka ay ka soojeedaan.

Waajibka daryeelidda

Sida barayaasha, dhakhaatiirta, shaqaalaha dhallinyaradu waxay leeyihiin waajibaad ay ku dhaqaaleeyaan dadka dhallinyarada ah kuwaas oo ka soo qaybgala barnaamijyadooda ama nashaadyadooda – ammaanka ka-soo-qaybgaleyaasha waa mudnaanta kowaad. Taasna waxaa loo yaqaan 'waajibka daryeelidda'.

Qarsoodinimada

Shaqaalaha dhallinyarada waxay leeyihiin waajibaad ay ku ixtiraamaan 'qarsoodinimada'. Taas macnaheedu waa in macluumaadka shakhsi kaas oo lala qaybsaday shaqaalaha dhallinyarada si gaar ah loo ilaaliyo. Shaqaalaha dhallinyarada kalama hadli karaan dadka kale wixii ku saabsan macluumaadka shakhsiga ah ayadoon la helin ogolaanshaha qofka dhallinyarada ah ama qoyskiisa, inay jirto arrin degdeg ah oo u baahan inay cid kale la qaybsadaan macluumaadka maahee si loo ilaaliyo qofka ammaankiisa. Ixtiraamka ama 'dhowridda qarsoodinimada', waxay macnaheedu tahay in dadku awoodaan inay ku kalsoonaadaan inay la qaybsan karaan dhibaatooyinka ayadoon dadka kale ogaan arimahooda.

© Centre for Multicultural Youth Issues 2006

Maxaan samayn karaa haddii aan qabo wax su'aalo ama cabashooyin ah?

Shaqaalaha dhallinyarada waxay leeyihiin waajibaad ah inay ku siiyaan macluumaadka ku saabsan barnaamijyadooda ama adeegyadooda ayna kaala hadlaan wax kasta oo aad ka cabanayso. Waxaa muhiim ah inaad weydiiso haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan barnaamijyada ama nashaadyada dhallinyarada uu ilmahaagu doonayo inuu ka qaybgalo. Qoysaska ka soojeeda asallada dhaqaneed oo dhan waxay ka walwalsan yihiin halka ay tegayaan xubnaha qoyskooda dhallinta yar iyo cidda ay la joogaan marka aysan joogin guriga. Waa wax caadi ah in qoysaska doonaan inay hubsadaan in carruurtoodu ay faraxsan yihiin, nabdoon yihiin oo si fiicanna loo daryeelo.

Qamaan

Qamaan wuxuu ahaa nin dhallinyaro ah oo 16-sano jir ah kaas oo ay dhibaatooyin ku haysteen guriga. Asaga iyo aabihiis badanaa way murmaan sababtoo ah Qamaan wuxuu doonayey inuu baxo maalmaha aan shaqadu jirin (weekend) iyo inuu lacag ugu jirto akoonka bangigiisa. Aabihiis sidaas kuma faraxsanayn, wuxuuna ka walwalayey inuu raacayo dadka saamaynta xun ku leh.

Qamaan wuxuu u tegey shaqaalaha dhallinyarada oo u dhow dugsigiisa wuxuuna ku yiri inuu doonayo inuu ka tago guriga si uu u helo madaxbannaani. Shaqaalihii dhalinyaradu ayaa kala hadlay waxa ka dhaca guriga wuxuuna ka codsaday ogolaansho inuu la xirriiro qoyskiisa si uu isugu dayo hab uu ku hagaajiyo wada xirriirkooda.

Markii Qamaan aabihiis uu helay wicitaankii shaqaalha dhallinyarada wuxuu la yaabay in cid kale oo ka baxsan qoyska ogaato dhibaatooyin kala dhaxeeya wiilkiisa. Wuxuu ka walwalsanaa waxa ay xubnaha kale bulshada Soomaalidu ay oranayaan haddii ay sidaas ogaadaan. Wuxuu kaloo ka walwalsanaa in qofka shaqaalaha dhalinyaradu uu isku dayayo inuu ku dhiirigeliyo wiilkiisa inuu ka tago guriga. Hase ahaatee, wuxuu doonayey inuu kala hadlo qofka shaqaalaha dhallinyarada ah si uu u ogado waxa jira, wuxuuna go'aansaday inuu yimaado kulan si uu uga hadlo waxa uu doonayo.

Qofkii shaqaalaha dhallinyarada ahaa wuxuu diyaarshey turjumaan, wuxuuna aabihii iyo wiilkii ku dhiirigeliyey inay wadajir u wada-hadlaan. Wuxuu u sheegay in qoysas badan ay nolosho ku adkaatey halkan Australia, ayna aad u fiican tahay inay ayaga oo dhan diyaar u yihiin inay ka wada-hadlaan walwalkooda. Qofkii shaqaalaha dhallinyarada ahaa wuxuu yiri inuusan ku khasbi karin Qamaan inuu guriga joogo, hase ahaatee inay wadajir isugu dayaan inay xal u helaan si ay farxad wadajir ugu noolaadaan.

Dhowrkii bilood ee ku xigtey waxaa wada kulmayey qoyskii iyo qofkii shaqaalaha dhallinyarada ahaa waxay sameeyeen dhowr heshiis oo ku saabsan waxa u wanaagsan qoyska. Qamaan aabihiis wax walba ma jeclayn oo Qamaan sameeyo, hase ahaatee wuxuu ku faraxsanaa in wiilkiisu ku nool yahay gurigooda uuna ku soconayo heshiiskii ay samaysteen. Mar dambena wax muran ah ma dhexmarin ayaga.

La-xirriiridda shaqaalaha dhallinyarada



Waad la xirriiri kartaa shaqaalaha dhallinyarada ama isu-duwaha barnaamijka haddii aadan hubin u ogolaanshaha xubin qoyska ka mid ah inuu ka qaybgalo barnaamijka ama nashaadka dhallinyarada. Sida badan, adeegga, barnaamijka ama nashaadku wuxuu yeelanayaa magac lala xirriiri karo iyo taleefoonka qofka shaqaalaha dhallinyarada ah ama qofka ka masuulkaa ah.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan, waxaad kaloo codsan kartaa arrintaas. Badiba shaqaalaha dhallinyarada waa inay la socdaan adeegsiga turjumaanada xirfadda leh waxay ixtiraamayaan xaqa aad u leedahay inaad kula hadasho luqaddaada aad doonayso. Waxaad kaloo ugu tegi kartaa shaqaalaha dhallinyarada meesha ay ka shaqeeyaan, ama waxay awoodi doonaan inay kuugu yimaadaan gurigaaga ama ay kugula kulmaan meeshii kale oo aad doonayso.

Waxyaalaha laga yaabo inaad weydiiso waxaa ka mid ah:

- Maxay yihiin nashaadyada uu ilmahaygu ka qaybgeli karo?
- Yaa joogi doona halkaas yaase kormeeri doona ayaga?
- Side baan ku ogaan karaa inay ammaan yihiin?
- Ma siin doontaan waxyaalaha uu ilmahaygu u baahan yahay – sida meesha lagu tukado, ama cunto gaar ah?
- Sidee ku tegayaan meesha nashaadka iyo guriga markaas ka dib?

Gabogabo

Waxaan filaynaa in macluumaadkan uu si fiican kaaga caawin doono inaad fahamto kaalinta iyo muhiimadda shaqaalaha dhallinyarada ah iyo adeegyada dhallinyarada ee Australia ka jira. Qof kastaa oo Australia u soo haajirey wuxuu xaq u leeyahay inuu Australia ka samaysto mustaqbal farxad leh uuna qayb ka helo fursadaha ay bixiso. Shaqaalaha dhallinyarada iyo adeegyada waxay qoysaska ka caawiyaan siday sidaas u samayn lahaayeen.

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wax kasta oo buug-yarahan ku jira ama aysan kuu caddayn wax ka mid ah macluumaadka, waxaad la xirriiri kartaa

- Shaqaalaha dhallinyarada ama adeegyada dhallinyarada oo ka jira degaankaaga ama dowladda hoose ee kuu dhow www.youthcentral.vic.gov.au
- Centre for Multicultural Youth Issues www.cmyi.net.au
- ABCD Parenting Young Adolescents www.abcdparenting.org.au
- Familiy Services Australia www.fsa.org.au

© Centre for Multicultural Youth Issues 2006